

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Baarlamaanka Federaalka ah

Golaha Aqalka Sare



جمهورية الصومال الفيدرالية

البرلمان الفيدرالي

مجلس الشيوخ

Federal Republic of Somalia

Federal Parliament

The Upper House

Nuqulka Rasmiga Ah ee Hadal Qoraalka Gaaban ee Golaha Aqalka Sare ee BFS

Si waafaqsan Qod.39aad ee Xeer hoosaadka Golaha Aqalka Sare.

Baarlamaanka 11 ^{aad}	
Kalfadhiga: 8 ^{aad}	Kulankiisa: 8 ^{aad}
Taariikhda: 21/09/2026	Goobta Fadhiga: Xarunta Aqalka Sare
Saacadda uu Furmay: 11:27 AM	Saacadda uu Xirmay: 11:58 AM
Shir Guddoonka Fadhiga: Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare Senator Cabdi Xaashi Cabdullahi	Guntanka Kulanka: 28 Senator
Martida Kulanka: 1. Wasiiru dowlaha Wasaaradda Maaliyadda Marwo Raaxo Maxamuud Janaqoow. 2. Wasiir Ku-xigeenka Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka. Mudane Axmed Cabdiraxmaan Xasan	Ajendayaasha Kulanka: 1. Akhrinta Aayadaha Qur'aanka. 2. Ansixinta Ajendaha. 3. Akhrinta 3aad ee Hindise Xeereedka Dhismaha Hay'adda Dakhliga. 4. Ansixinta Labada Xubnood ee magacaaban ee Guddiga Madaxa-bannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka.

Furitaanka Kulanka:

Senator Xasan Xuseen Xaaji ayaa akhriyey Aayadaha Qur'aanka ee Kulanka lagu furay.

Ansixinta Ajendayaasha Kulanka:

Guddoomiyaha Golaha Senator Cabdi Xaashi Cabdullahi ayaa xubnaha kulanka fadhiyey ka codsaday in ay ansixiyaan Ajendayaasha kulanka, codayntii ayaana u dhacday sidaan:

Oggol: 27 Senator

Ka aamusay: Majirin

Diidmo: Majirin

Nuxurka Kulanka:

Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare Senator Cabdi Xaashi Cabdullahi ayaa u yeeray Guddoomiyaha Guddiga Dhaqaalaha, Maaliyada, Ganacsiga, Isgaarsiinta iyo Dalxiiska Aqalka Sare Senator Cabdi Axmed Dhuxulow si uu Golaha uga hor akhriyo warbixinta Akhrinta 3aad ee Hindise Xeereedka Dhismaha Hay'adda Dakhliga. Warbixinta kaddib, Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare ayaa cod geliyey Ansixinta Hindise Xeereedka Dhismaha Hay'adda Dakhliga, waxay u dhacday sidan: **Oggol: 27 Senator** **Ka aamusay: Majirin** **Diidmo: Majirin**

Intaas kaddib, Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare Senator Cabdi Xaashi Cabdullahi ayaa u yeeray Wasiir Ku-xigeenka Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka. Mudane Axmed Cabdiraxmaan Xasan si uu Golaha uga hor akhriyo warbixinta Ansixinta Labada Xubnood ee magacaaban ee Guddiga Madaxa-bannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka. Warbixinta kaddib, Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare ayaa cod geliyey Ansixinta Labada Xubnood ee magacaaban ee Guddiga Madaxa-bannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka, waxay u dhacday sidan: **Oggol: 27 Senator** **Ka aamusay: Majirin** **Diidmo: Majirin**

Ansixinta kaddib, Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare ayaa u yeeray Wasiiru dowlaha Wasaaradda Maaliyadda iyo Wasiir Ku-xigeenka Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka si ay uga mahadceliyaan xubnaha senatarada Golaha Aqalka Sare ansixinta Hindise Xeereedka iyo Labada Xubnood ee magacaaban ee Guddiga Madaxa-bannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka.

Go'aamada kulanka:

1. Ansixinta Ajandayaasha kulanka.
2. Ansixinta Hindise Xeereedka Dhismaha Hay'adda Dakhliga.
3. Ansixinta Labada Xubnood ee magacaaban ee Guddiga Madaxa-bannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka.
4. Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare ayaa faray in labada xubnood lagu dhaariyo xafiiskooda.

Ugu dambayntii, Guddoomiyaha Golaha Senator Cabdi Xaashi Cabdullaahi ayaa kulanka soo xiray saacadu markay ahayd **11:58 AM**.

=DHAMMAAD=